KMM/04/21 Tr: 02/2/2021

# WAR-SAXAAFADEED

# SHIRKA DHUUSAMAREEB

Kudladda Musharaxiinta Madaxweyneyaasha dhexdhaxaadka ah waxay marxaladdan Xasaasiga ah ee uu Dalka marayo ka soo saaraysaa war saxaafadeedkan.

Iyadoo laga ambaqaadayo xaaladda cakirin ee Dalku ku suganyahay, muddo xileedka Madaxweynaha oo ku eg 8da Febraayo iyo Shirka lagu xallinayo khilaafaadka hareeyay doorashooyinka Dalka ee ka soconaya Dhuusamareeb oo ay ku dhanyihiin Mas'uuliyiinta Dowlad-goboleedyada iyo Dowladda dhexe waxay Kudladdu ku baaqaysaa:

- In Madaxweynuhu ka faa'iidaysto fursada qaaliga ah ee uu maanta haysto, una turo Dadka Soomaaliyeed ee ka dhursugaya shirka, maadaama ay asiga u doorteen Mansabka ugu sareeya Dalka, hormuudna uu noqodo tanaasul kasta ilayn "Ul nin dheer ayay ku dhacdaaye."
- In Madaxweynuhu iska casilo xilka Madaxwaynenimada Dalka intaan la gaarin 8da febraayo haddii uu ku guuldareeysto xal u helidda arrimaha doorashooyinka ee lagu murasan yahay.

- In Maamul-goboleedyada Dalka ay ku dadaalaan wax kasta oo ay Dadka Soomaaliyeed iskugu soo dhowayn kara.
- Ugu dambayn waxay Kudladdu uga mahadcelinaysaa Beesha Caalamka dadaalada aan loo kala harin ee hiil iyo hooba leh, oo ay la garab taagan yihiin Shacabka Soomaaliyeed mar walba.

Wabillaahi Towfiiq